



Sheeko xariirtu waa aasaaska waxbarashada carruurta Soomaaliyeed

Intuu yabey ayuu ku idhi, “Naa dawaco yaa geedka kugu xir-xiray?” Markaas ayey dawacadii tiri, “Waxa igu xirau adeerkay.” Waraabihii (Dhurwaa) ayaa hadana yiri, “ Oo muxuu kuu xiray?” Dawacadii ayaa tiri, “ Adeerkay aad buu ii jicelyahay.” Wuxuu arkay in aad caato ahay markaa wuxuu ii qalay wan weyn oo aad u buuran. Dabkaasna wankaas ayaa lagu karin doonaa. Aniguna waan diidanahay in aan cuno wankaas buuran, waayo gaajo ima hayso oo maalmahan oo dhan ayaan hilib cunayey, oo waxaan ka cabsanayaa inaan calool xanuun ka qaado. Markii aan damcay in aan ka tagana, intuu I soo qabtay ayuu geedkan igu xidhay. Markaan hilibkii cuni kari waayeyna wuu i diley.



Waraabihi ayaa intuu afka aad u kala qabtay illeen waa wax hilib iyo baruur jecel yidhi, “ ihi! ihi! ihi! aniga ayaa xariga kaa furaya ee aniga geedka igu xir, si aan anigu u cuno hilibkaas adiguna uga nabad gasho.” Markii dadkii ku soo noqdeen meeshii dawacadu ku xirnayd, si ay dabka ugu dhex tuuraan, waxay u yimaaddeen waraabe ku xiran geedkii. Dadkii ayaa intey yaabeen yidhi,” War Waraabe aawey dawacadii?” markaas ayuu waraabihi yiri, “ aniga ayaa xarigii ka furay oo way tagtay.” Dadkii ayaa yiri, “ waxay I tiri dawacadii anigu gaajo ima hayso, ee hilibka la ii keeni lahaa adigu cun.” Markaas ayeey dadkii isagii dabkii ku tureen.